QIYAMKA 14
Salaamo Qoyska Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb,

Waxaan rajeynayaa inaad isbuuc wanaagsan la kulantay. Wuu mahadsanyahay qof walba oo jawaab celintooda inaga oo u diyaar garoobeyno ku laabashada waji ka waji. Degmada waxay raaceysaa hagida ka timid Waaxfa Caafimaadka Bulshada Georgia (DPH), Waaxda Waxbarashada Georgia, iyo Guddiga Caafimaadka Gobolka DeKalb. Sida ay sababtay xogta isbadeleyso ee ka timid Guddiga Caafimaadka Gobolka DeKalb ee ka badan isku celcelis 14-maalin ee 100,000 dagayaasha Gobolka DeKalb, waxaan u diyaar garoobeynaa inaan u guurno degmada ee Wajiga II ee qorshaheena waji ka waji markii ay suurtogal noqoto. (Afeefta: Waaxda Caafimaadka Bulshada Georgia waxay soo wargeliyeen tirada iyo aqbaaraha xogta sida warbixinta cusub loo helay).

Sida ka bilow maanta isku celceliska waa 103. Isku celceliska wuxuu ku sii soconayaa in si joogta ah loo kormeero sababtoo ah waxaan dooranay inay na hogaamiso sayniska iyo xogta naloo heli karo inaga. Guddi Howleedka DCSD ee Dib u furida COVID-19 waxay sii wadeen inay kormeeraan isbadelada oo sameeyeen saxitaano sida la damaanad qaaday inay hubineyso badbaadada iyo fayo qabka ardayda oo dhan, kulliyada, iyo shaqaalaha.

Tan iyo ka qeybgalkeena ugu dambeysay, waxaan la kulannay Kooxyada Macalinka iyo La talinta Waalidka DCSD iyo maamulayaal kala duwan si ay u helaan jawaabtooda. Degmada way la socotaa waaladiinta walaacsan iyo daneeyayaasha bulshada oo wadaagay boosaskooda kala duwan ee la xiriirto ku soo laabashada waxbarashada waji ka wajiga. Iyada oo aan aqoonsannahay inay jiraan waaladiinta go'aansaday dib u furid degdeg ah ee dugsiyada, waa muhiim inaad xasuusatid inay tahay inaan dheelitirno walaacyada dhammaan daneeyayaasha bulshada si markaas si badbaado ah loogu furo dhinaca qaabka fullinta.

Ururka Quburada DCSD COVID-19 waxay kulmaan maalin walba oo way sii wadayaan inay qiimeeyaan waxa looga baahanyahay si loo hubiyo in fasaladeena, xarumaha, iyo basaska ay badbaado u yihiin, iyo in aan leenahay jawiyo wanaagsan oo dhammaan daneeyayaasha DCSD. Illaalinta badbaadada ardaydeena, macalimiinta, iyo shaqaalaha inta lagu jiro cudurka safmarka socdo waxay ahaaneysaa mudnaanta koowaad ee Degmada.

Shaqaalaha
Xiliga Oktoobar 19ka, Guddi Howleedka DCSD ee Dib U furida COVID-19 waxay soo bandhigayaan qorshaha la cusbooneysiiyay ee Guddiga Waxbarashada Gobolka DeKalb ee La xiriiro jadwalka waqtigeena. Waxaan sii wadeynaa inaan ka saarno Qorshaheena Waxbarashada Waji ka Wajiga sida ku saleysan jawaab celinta ka imaaneyso waaladiinta, macalimiinta, iyo daneeyayaasha bulshada kale.

Ardayda
Sida looga hadlay aqbaarta isbuuca la soo dhaafay, ardayda waxay sii wadeen inay ku bartaan jawiga waxbarashada fogaanta/onleenka ee Wajiga II ka hor intaan loo guurin Wajiga III. Inta lagu jiro Wajiga III, waaladiinta/masuulada waxay leeyihiin dooqa waxbarashada isku dhafka ah ama waxbarashada fogaanta/onleenka ah. Rabitaanka

Foomka Soo noqodka waxaa la qeybiyay Oktoobar 9ka marka in waaladiinta/masuulada ay dooran karaan dooqooda la doorbiday oo canug walba. Jawaabaha waxay u ogolaaneysaa dugsiyada deegaanka inay u diyaariyaan ardayda kooxyo yaryar si loo joogteeyo sharuudaha fogaanta ee fasalada inta lagu jiro waxbarashada isku dhafka iyo u qorsheynta ardayda oo sii wadeyso ku barashada onleenka ee guriga marwalba ee Wajiga III bilowdo.

Linkiyada: https://dekalb.co1.qualtrics.com/jfe/form/SV_cO7CQFP10BWfwuF

Noocyada waxbarashada la tixgelinayo waa sida xigto:

Nooca Waxbarashada Isku dhafka (Isku darka Waxbarashada Waji ka Wajiga iyo Fogaanta/Onleenka ah):

Nooca waxbarashada isku dhafka waxaa loo naqshadeeyay qoysaska dareemo inay ku raaxo qabaan inay ku soo celiyaan carruurtooda waji ka wajiga, jawiga dugsiga lagu daray waxbarashada fogaanta/onleenka ah. Ardayda waxay heleysaa fursada loogu dhaxgalayo qof ahaan si badbaado macalimiintooda iyo isku fasalka. Qoysaska way dooran karaan nooca waxbarashada fogaanta/onleenka xili walba iyaga oo ka buuxinayo Rabitaanka Badelka ee Foomka Soo noqodka ee dugsiga deegaanka.

Ardayda iyo shaqaalaha waxaa looga baahanayaa inay xirtaan daboolada wajiga ama maaskarooyinka. Sidoo kale, ardayda waxaa looga baahanayaa inay la imaadaan dugsiga qalabyadooda degmada siisay ama gaarka u ah.

Nooca Waxbarashada Fogaanta/Onleenka:

Nooca waxbarashada fogaanta/onleenka waxaa loo naqshadeeyay qoysaska aanan ku dareemin raaxo in carruurtooda ku soo laabtaan dugsiga waqtigaan oo qaabka waji ka wajiga ah. Ardayda waxay sii wadayaan inay ka bartaan guriga oo qaabka onleenka ee dugsiga bixiyo. Qoysaska waxay helayaan fursada loogu meelgaarayo nooca waxbarashada qof ahaanta hadeer oo hakadka buundeynta 4.5-isbuuc iyada oo la buuxinayo Rabitaanka Badelka ee Foomka Soo noqodka ee dugsiga deegaanka.

Dhammaan qoysaska waxaa lagu dhiirogelinayaa inay buuxiyaan Foomka Rabitaanka Ku laabashada xiliga Oktoobar 23, 2020. Ka hor buuxinta foomka, fadlan hel lambarka aqoonsiga ardayga canugaaga (lambarka qadada ama lambarka gelitaanka Chromebook). Haddii aadan haynin lambarka aqoonsiga ardayga canugaaga, booqo Bogga Waalidka, ka fiiri wargelinta hormarka dhawaan ee canugaaga, ama la xiriir macalinka canugaaga.

Diyaarinta aqoonyahanadeena iyo qoysaskooda oo wajiyada labaad ee qorshaheena dib u furida waa mudnaanta koowaad. Waad sii wadi kartaa inaad filatid aqbaaro cusub ee la xiriiro qorshaha dib u furida oo dhinaca aqbaarahaan, websaydkeena DCSD, websaydyada dugsiga, fariin qaadaha dugsiga iyo xiriirada warbaahinta bulshada (Facebook, Twitter, iyo Instagram).

Goobta

Waxaan ku faraxsannahay inaan kula biiro booqashada goobta ee Region I Kormeeraha guud, Gabar Melanie Pearch. Kormeeraha guud ee Goboleedka Pearch iyo aniga ayaa booqanay Dugsiga hoose Ashford Park, Dugsiga hoose Doraville United, iyo Dugsiga Sare Chamblee. Hambalyooyin ku aadan Kittredge Magnet ES iyo Austin ES iyo ahaanshaha Dugsiyada Blue Ribbon. Waxay sidoo kale aheyd cajiib inaan aragno in Cross Keys la kulmay kobaca ardayga iyo mabaadi'da kale ee waaya araga ee qeybtaan oo ay ka go'antahay dugsiyadooda. Sida Maamule Cedric Anthony waxay ka tiri Dugsiga dhexe Sequoyah, "Waxaan abuurnay miraha ku caawinayo geedaha inay kobcaan ee siinayo harka laga yaabo inaanan marnaba hoos fariisan."

Waad ku mahadsantihiin qoysaska badan ee sii wado inay waqti ku qaataan ay aniga igula xiriiraan oo i weydiiyaan su'aalo ama wadaagaan jawaabtaada qiimaha leh. Sida dadaalka ah ee lagu hubinayo in qof walba helo jawaab celin, fadlan ku aadi su'aalahaaga iyo jawaab celintaada kormeerahaaga guud ee goboleedka iyo maamulayaasha. Waan ogahay inay midaan ay u tahay waqti aad u murugo badan kuwa badan oo qoysaskeena DCSD. Sida aan qorsheyneyno sannad dugsigeena kobcayo, waxaan rabaa inaan xooga saaro balanqaadkeyga adag ee ku aadan badbaadada aqoonyahaneeda iyo heer saraanta waxbarashada.

Hogaankaaga kooxda ee #1,

Cheryl Watson-Harris